



Kooxda Akhriska Hagaha Wada-hadalka

SOO BANDHIGID

Sameynaayo qofka buugga xushtey – waa maxay sababta loo xushtey iyo warar gaaban ee ku saabsan qofka buugga qorey.

JAWAABTA SHUCUUREED EE GUUD

Ra'yiga koowaad. Miyuu yahay buug ku soo jiidanaayo, si deg-deg ah sheekada u sheegayo ama waa mid si tartiib ah kuu soo jiidanaayo, miyaad dareemtaa inaad ka faa'iidey akhriska buugga ama waa buug aad waqtiga iskaga qasaarisey? Waa maxay sababta?

MUXUU KU SAABSAN YAHAY?

Muxuu ku saabsan yahay buugga, waxyaabaha uu ka hadlo iyo farriinta u baxsho iyo sidee loo baxshaa? Miyuu yahay buug la xasuusan doono – ama ma ahan? Waa maxay qeybaha muhiimka ah ee sheekada beddelo?

DADKA SHEEKADA KU JIRO

Sidee loo sharxey dadka sheekada ku jiro? Miyaad ammineysaa? Sidee ayeey u wada hadlaan? Kuwee ayaa ah kuwa xoogga leh iyo kuwa tabar la'aanta ah? Miyaad isku aragtaa inaad tahay hal ka mid ah dadka sheekada ku jiro?

WAXYAABAH A XOOGAN & TABAR LA'AANTA AH

Qaybaha fiican iyo kuwa xun. Waxyaabaha sii fiican loo qorey iyo waxyaabaha si xun loo qorey. Si guul ah miyaa sheekada/qisada loo qorey? Si fiican miyuu sheekada ku dhammaadaa iyo miyuu yahay wixii aad fileysey? Miyeey jiraan wax micnoowi ah ee ku saabsan hab-socodka iyo habka qoridda? Sidee ayeey kuu cawiiyaan ama uga hortagaan akhriska?

ISKU EEG OO IS- BARBAR DHIG

Sidee ayuu buugaan kula yahay markii aad u barbar dhigto buugaag kale oo noocan ah ee isla qofka qorey?

RAADKA UU GEBI AHAAN LEEYAHAY

Dareen sidee ah ayuu buugga kugu dhaafey? Miyeey sheekada ka jiraan waxyaabo noloshaada ku dhacey ee la mid ah? Miyuu si kale kaa darensiiyey qof ama wax? Miyaad dib u akhrin doontaa buug kale uu isla qofka qorey? Ra'yi sidee ah ayuu kaa siiyey qofka buugga qorey?

DHIBCO SIIN 1 ILAA 10

Waxaa maad leh haddii aad xubin walba ka codsato inay buugga siiyaan dhibco gaaraayo ilaa toban. Isku dar dhibcooyinka kadibna diiwangeli si aad sanadka dhammadkiisa ku ogaato buugga gebi ahaan looga jeclaa sanadka.